

**FAAFINTA**

الرسمية



**RASMIGA**

الجريدة

**DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOOMAALIYA**

لولاية ارض بونت الصومال

Sanadka 8-aad. Garowe 25. January. 2007

Lam. 1

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

*Qeybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland*

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 walba rukunka sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudihiiisa dibada Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowday 1-da Janaayo qiimaha qoritaanka F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybtä maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wassaaradda maaliyadda.

## **TUSMADA**

**Qeybta Koowaad**

**Sharci**

**Qeybta labaad**

**Xeer**

**Qeybta Saddexaad**

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

*Sharci Lr. 4. ee 15/01/2007, kuna saabsan Sharciga heshiiska wax soo saar wadaaga ah ee Shidaalka iyo Gaaska Puntland.*

bogafa 62-66

**DAWLAD GOBOLEEDKA  
PUNTLAND EE SOMALIYA**



**PUNTLAND STATE  
OF SOMALIA**

**Xafiiska Madaxweyne ku xigeenka  
Ahna sii hayaha xilka Madaxweynaha**

**Office of the Vice-president  
being an acting president**

**Sharci Lr.4 ee 15/01/2007, kuna saabsan Heshiis wax soo saar wadaag ah ee  
Shidaalka iyo Gaaska Puntland.**

**Madaxweynuhu**

- |                          |          |  |
|--------------------------|----------|--|
| <b>Markuu arkay</b>      | <b>:</b> | Dastuurka DGPI qodobkiisa 55-aad faqradiisa 1-aad.                             |
| <b>Markuu arkay</b>      | <b>:</b> | Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Sumad XGGW/DGPL/193/2006 ee 23/12/2006. |
| <b>Asagoo Garowsaday</b> | <b>:</b> | Ansixinta Sharcigan ee Golaha Wakiilada.                                       |
| <b>Tixgaliyeyna</b>      | <b>:</b> | Muhimada iyo Qiimaha weyn ee Mashruuca dalka iyo dadkaba ugu fadhiyo           |

**Wuxuu soo saaray**

**Sharcigan soo socda:-**

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sida kor ku cad sharciga Heshiiska wax soo saar wadaaga ah ee Shidaalka iyo Gaaska.

**Qodobka 2-aad**


Nuqlada asalka waxaa lagu kala keydinaya Xafiiska Madaxweynaha, kan garyaqaanka guud iyo kan xog-hayaha Golaha Wakiilada.

**Qodobka 3-aad**

Dhaqan galka sharcigani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintii sharcigani faafinta rasmiga ah ee Dawlada ku soo baxay. Wuxuuna kamid noqonayaa sharuucda Puntland, iyadoo cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhowro kuna dhaqmo.

**Wabilaahi Towfiiq**

**Mud. Xasan Daahir Maxamuud  
Madaxweyne ku xigeenka  
ahna Sii haya Xilka Madaxwenaha**





## HESIIISKA WAX-S00-SAAR WADAAGA

### (PRODUCTION SHARING AGREEMENT)

PSA... Waxaa Saxiixaya Madaxa Wakaalada oo ka socda Dowladiisa iyo Labada Shirkadood oo kala ah Ranges & Canmex, Shirkadahaas oo leh awood dhaqaale iyo mid Khibradeed oo ay ku fulin karaan Baarista Shidaalka iyo Soosaarka, Heshiiskani wuxuu siinayaa shirkadaha xaqa hawlgalka masaafada ama (Blocks) lagu heshiiyey.

### Xiliga Baarista (Exploration Periods)

- ✓ Xiliga baarista shidaalka marka hore waa sadex sano ugu badnaan, waxaana lagu dari karaa sadex sano oo kale codsi ka dib, taasoo ku xiran fulinta masuuliyadii saarnayd qandaraaslayaasha sadexdii sano oo hore,
- ✓ Qandaraasluhu waa inuu ka tanaasulaaya 25% masaafadii (Blocks), markay dhamaato Sadexda sano iyo intii loo cusboonaysiiyey.
- ✓ Qandaraaslahu haduu gutay waajibaadkiisa xiliglii heshiiska ee dhamaaday, wuxuu ka tanaasuli karaa xuquuqdiisa iyadoo aan ganaax jirin,
- ✓ Xiliga baarista shidaalka waxaa ku waajiba shirkadaha inay fuliyaan ugu yaraan hawl xiliyedka lagu heshiiyey oo garaaya 5 million oo dollarka marekanka ah.

**Xiliga wax soo saarka (Production Periods)**

- ✓ Markii loo gudbo in la gaaro wax soo saarid,
- ✓ Shirkaduhu waxay soo bandhigayaan qorshaha wax soo saarka iyadoo kala kaashanaysa Wakaalada Macdanta iyo Shidaalka ee GPL.
- ✓ Xiliga heshiiska wax soo saarku waa 20 Sano, waxay shirkaduhu codsan karaan in loogu daro 5 sano hadii ay GPL ay ogolaato..
- ✓ Qandaraaslahu wuxuu xaq u leeyahay saami wixii soo baxa.
- ✓ Qiimaha shidaalaka ceeriin waa kan aduunka markaas.  
*(Maanta wuxuu ahaa \$59.40 usd)*

**QAYBSIGA SHIDAALKA AMA GAASKA.****ROYALTY:**

Ugu horayn marka uu Shidaal arna Gaas soo baxo waxay dowladdu xaq u leedahay iney intaan wax kala la qaybin ay ka goosato royalty oo sidatan loogu qondeeyey.

Celcaliska Waxsoo saarka maalintii (1-25,000 Fuusto )-----	Royalties (4%)
Celcaliska Waxsoo saarka maalintii (25000 – 50,000)-----	Royalties (5%)
Celcaliska Waxsoo saarka maalintii (50,000 -- 75,000)-----	Royalties (7%)
Celcaliska Waxsoo saarka maalintii (75,000 -- 100,000)-----	Royalties (9%)

Celceliska Wax-soo-saarka maalintii in ka badan 100,000 Fuusto waxaa Royalties-ku uu Noqonayaan ---- (10%)

**Dib u celiska kharaj howleedka (Cost Recovery and Production Sharing )**

Markii laga gooyo royalties waxaa inta soo harta loo qaybinaaya sidatan:

Shirkaduhu waxay ceshanayaan wixii kharash ah oo ka galay soo saaridii shidaalka, ugu badnaan boqolkiiba 70%, wixii intaa ka badan oo shirkadu yeelato waxay u gudbisan karta sanadka xiga.

(Kharjka galay waxaa xaqijinaya wakaalada marka ay shirkaduhu soo gudbiyaan iyadoo tafatiran)

**Faa'iido wadaag (Profit Sharing)**

Markii laga saaro Royalties iyo kharash howleedka wixii fa'iido ah oo soo hara waxaa loo qaybsanaaya 50% oo dowladda ah iyo 50 % oo shirkadaha ah.

**Abaal-Marinta (Bonuses)**

**Heshiiskani wuxuu Puntland siinayaan Abaalmarino kala duwan sida.**

1. Abaalmarinta wax soo saarka

- ✓ \$1,000,000 (Hal Milyan)..  
(Marka Waxa soo saarku yahay ilaa 25,000 fuusto malintii)
- ✓ \$2,000,000 (Laba Milyan)  
(Marka Waxa soo saarku gaaro ilaa 50,000 fuusto maalintii)
- ✓ \$3,000,000 (Sadex Milyan)  
(Marka Waxa soo saarku gaaro ilaa 75,000 fuusto maalintii)
- ✓ \$4,000,000 (Afar Milyan)  
(Marka Waxa soo saarku gaaro ilaa 100,000 fuusto maalintii)  
\$5,000,000 (Shan Million Bishii)

Xusuus:(Lacagtan lagama jarayo Boqolayda wax soo saarka)

**Abaalmarinta Tababarada:**

Shirkadaha heshiiska galay waxay Puntland siinayaan sodon casho gudahood marka heshiis kani dhaqan gal...\$100,000 (Boqol kun oo Doolar), waana sanadle, taasoo loogu tala galy in lagu tababaro Shaqaalah wakaalada macdanta iyo shidaalaka GPL.

**Horu marinta Wakaalada.**

Shirkaduhu waxay bil gudaheed marka heshiisku dhaqan galay ay siinayaan Wakaalda Macdanta iyo shidaalka Dgpl lacag dhan \$50,000 (Konton Kun) Waana sanadle...Lacagtaas oo loogu tala galay in lagu kabu baahida wakaalada.

**Horu-marinta Bulshada.**

Shirkadahu waxay bil guaheed marka heshiisku dhaqan galay ay siinayaan GPL Lacag dhan \$100,000 (Boqol Kun) sanad walba, Taasoo loogu tala galay arimaha horumarinta dalka.

Confidential

**Tusaale yar:**

Ka soo qaad in ceelasha mid kamid ama celceliskooda laga soo saaro shidaal dhan 100,000 barmiil maalintii (Yemen oo aad inoola mid ah waxaa ceelka ugu horeeyey laga soo saari jiray ilaa iyo 400,000 oo barmiil) haddaynu qiyasno waxaynu qayb u yeelaneena sidatan:

Qiimaha barmiilkha suuqyada caalamiga maanta waa \$54.95 ka soo qaad in isaga oo ceerin uu joogo \$30.

$100,000 \text{ Maalintii} \times 30 \text{ Maalmood} = 3,000,000 \text{ Milyan oo Barmiil}$   
 $3,000,000 \text{ Bermiil Bishii} \times \$30 \text{ (Qiimaha qiyastii)} = \$90,000,000.$

Royalty.

$\$90,000,000 \times 10\% \text{ o royalty ah} = \$9,000,000$

Markii laga gooyo qarashkooda waxaa so haraysa \$24,300,000.

Faa'iidata la wadaagayo:

$\$24,300,000 / 2 = \$12,150,000$

Inta waxaa dheer \$5,000,000 oo ah bonus oo aan boqolayda ka mid ahayn.

Markaad isku darto waxaay Qaybaa dowladdu noqoneyasa sidaan:

Royalty + Profit sharing + Production Bonus = Total Government Revenue

$\$9,000,000 + 12,150,000 + 5,000,000 = \$26,150,000.$

Mahadsanidiin:

Mudane. Xassan Cismaan Maxamuud  
Agaasimaha Guud  
Wakaalada Macdanta iyo Shidaalka GPL.